



Ku deeq muraayadaha indhaha ee qorax madoobaadka ee la isticmaalay

Madaxda gobolka Oregon ayaa qiyaasaya in boqolaal kun oo soo booqdayaal ahi ay ku soo biireen 4 milyan oo qof oo ku nool Oregon si ay ula kulmaan qorax madoobaadka buuxa ee ka dul gudbayay gobolka Ogoosto 21. In si toos ah loo eego qoraxdu waxay si halis ah u dhaawici kartaa indhaha dadka--iyada oo saameyntaasi ay sii weynaan karto inta lagu jiro qorax madoobaadka.

Si hab badbaado leh loogu fiiriyo qorax madoobaadka, dadku ku nool jidka ay sida buuxda u qaadayso qoraxdu waxaa lagu dhiirigelinayaa, [in ay sameeyaan dalool yar oo ileyska gudbiya](#), sameeyaan gudbiyaha ileyska qoraxda oo badbaado leh [iyaga oo isticmaalaya diirad/weynayso ama soo dhaweeyaaha 'telescope'](#), in ay xirtaan muraayadaha alxanlaha [oo leh qiyaasta hooska ee 14 ama ka sareysa](#), ama isticmaalaan muraayadaha indhaha ee qorax madoobaadka, kuwaasi oo si gaar ah loogu soo saarey in lagu fiiriyo qorax madoobaadka.

Muraayadaha indhaha ee qorax madoobaadka si ballaaran ayaa looga heli karaa Maraykanka: dadku waxay awoodeen in ay muraayadaha indhaha ee qoraxda oo badbaado leh ka gataan internet-ka meelaha ay ka mid yihiin Amazon.com iyo dukaamadooda laga adeegto oo kale ee degaanka ku yaala. Hay'adaha dadweynaha sida Maktabadda Degaanka Multnomah, ayaa si lacag la'aan ah ku bixisay kumaan muraayadaha indhaha ah. Laakiin dalalka kale ee adduunka, muraayadaha indhaha ee qorax madoobaadka maaha kuwo diyaar ah oo la heli karo, mararka qaarkoodna haba yaraatee lama heli karo, taasi oo dadka gelinaysa halis caafimaad oo khatar ah inta lagu jiro dhacdada dabiiciga ah.

Hay'ada qaranka ee aan faa'iido doonka ahayn, Xidigiyayaasha Aan Xuduuda Lahayn "Astronomers Without Border's" (oo halku dhigoodu yahay Hal Dadyow, Hal Cireed "One People, One Sky"), ayaa bilaabay soo ururinta muraayadaha indhaha ee qorax madoobaadka ee la isticmaalay si loogu diro dugsiyada dadweynaha ee Koonfurta Ameerika iyo Aasiya, halkaasi oo ay jidka sida buuxda u qaadayso qoraxdu la saadaalinayo ee qorax madoobaadka in uu ka dhaco 2019-ka. Ururku wuxuu iskaashi la yeeshay kooxo ka kala socda Maraykanka si ay u noqdaan goobaha lagu ururinayo, oo leh goobo la sii cayimay oo dadku ay ku dhaafi karaan muraayadaha indhaha.

Dugsiga Sare ee Madison wuxuu noqonayaa goobaha lagu ururinayo, waxaa mahada leh Naadiga Dhulka 'Earth Club' ee dugsiga. Sue House, oo ah macallimada sayniska iyo macallinka xiriiriyaha ah ee Naadiga Dhulka 'Earth Club', ayaa sameysay iskaashiga lala yeeshay Xidigiyayaasha Aan Xuduuda Lahayn 'Astronomers Without Border's' waxayna ku dhiirigelinaysaa waalidiinta iyo shaqaalaha PPS in ay muraayadaha indhaha ee la isticmaalay bisha dhammaadkeeda u keenaan, ama ku soo diraan boosta ama PONY (nidaamka boostada gudaha ee degmada) ee Dugsiga Sare ee Madison.

-Laura Hanson